



Qoysaska Australia



Sidee bay u e'gyihiin qoysaska Australia?



Halkan Australia waxaa ka jira noocyo kala duwan oo qoysas ah.



Aad bay uga duwan yihiin noocyadii qoysaskii aad hore u taqiin.



Qoysaska Australia waxaa ka mid ah:


- aabe, hooyo iyo carruur



- waalid-labaad iyo carruur labaad



- waalid xanaaneeye ah iyo carruur



- wiilal walaalo ah iyo gabdho walaalo ah kuwaas oo isxanaaneeya



- waalidiin isla jinsi ah



- awooweyaal iyo ayeeyooyin daryeelaya carruurta ay awoowaha iyo ayeeyada u yihiin



- hal waalid oo daryeelaya carruurta

Intee le'egyihiin qoysaska Australia?



Qoysaska Australia baaxad kasta ayey noqon karaan.




Qoysas badan keliya waxay leeyihiin 1 ama 2 carruur ah.



Qoysaska kale waxay yeelan karaan 3 ama 4 carruur ah.



Qoysaska qaarkood ma lahan carruur.



Haween badan ayaan lahayn hal ilmo ilaa ay ka weynaadaan da'da 30 sano.

Qoysaska ballaaran



Qoysaska ballaaran waxay leeyihiin qaybo badan oo qoysas wadajir u nool.



Qoysaska ballaaran waxaa ka mid noqon kara:

- awooweyaasha iyo ayeeyoyaasha
- eeddooyinka iyo adeerayaasha
- ilmo-adeerka




Dhammaan dadka Australia uma wada noola sidii qoysas ballaaran. Waalidiinta kuwaas oo gaboobey waxay ku nool yihiin:

- guryahooda ay leeyihiin



- guryaha gaarka oo lagu daryeelo dadka waaweyn

Haddaad guursatay




Ragga iyo haweenka halkan Australia wadajir ayey u wada-noolan karaan ayagoon is-qabin.



Taasna waxaa loo yaqaan common-law ama xiriirka gashaantiga.



Waxaa aqoonsan bulshada iyo sharciga.



Halkan Australia waxaad xor u tahay inaad guursato dadka ka soo socda:

- qawmiyada kale
- dhaqannada kale
- diimaha

18+

Waxaad u baahan tahay inaad ka weyn tahay 18 sano si aad u guursato.



Haddaad ka yar tahay 18 sano maxkamadda ayaa go'aamin karta inaad guursato.

Waxaad u baahan tahay inaad haysato sabab wanaagsan.



Guurarka Laysku-doono waa ok halkan Australia haddii labada qof:

- ay doonayaan inay isguursadaan
- ka weyn yihiin 18 sano



Cidna laguma qasbi karo inay guursadaan.



Guurka laysku-qasbo waa sharci-darro.



Waxaa kaloo sharci-darro ah in la yeesho wax ka badan hal nin ama hal naag isla waqti qura.



Haddii 2 qof aysan doonayn inay isa-sii-qabaan, way is-furi karaan.

Furriinku waa:



- caadi
- waa laga ogol yahay bulshada dhexdeeda

Waa wax iska caadi ah dadka Australia inay isguursadaan mar labaad kadib furriinkii.

Shaqada iyo shaqooyinka



Haween badan oo Australia ah waxay haystaan shaqooyin ka baxsan gurigooda.



Rag badan oo Australiyaan ah waxay gacan ka gaystaan shaqada guriga dhexdiisa laga qabto.



Waxay:

- soo-dukaameeyaan cuntada qoysku u baahan yahay
- kariyaan cuntada
- nadiifiyaan guriga
- daryeelaan carruurta



Ragga qaarkiis waxay joogaan guriga waxay ilaaliyaan carruurta intay haweenku soo shaqaynayaan.



Qaangaarku badanaa waxay haystaan shaqooyin waqti-dhimman ah kuwaas oo ku caawiya inay:

- lacag shaqeeyaan
- bartaan xirfado cusub



Haysashada shaqada waxay ka caawin kartaa inay:

- waayo-aragnimo u yeeshaan shaqada
- lacagta
 - naftooda
 - inay ka caawiyaan qoyska inay biilalka iska bixiyaan



Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka
ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee
Adeegyada Bulshada

